

Niyad Jabka Dhalinyarada iyo Is-dilka

Quraafaadka iyo Xaqiiqada

Khuraafaadka laga aaminsanyahay ee saabsan niyad-jabka iyo is-dilidda dhalinyarada ayaa inta badan ka hortaagan daaweyn wax ku ool ah iyo taageero inay helaan sdi looga hortagi lahaa is-dilidda. Waa muhiim in dhammaan dadka waawayni ay bartaan xaqiiqooyinka ku saabsan is-dilida si aan u siinno dadka da'da yar macluumaad iyo taageero.

Khuraafaad: Ka hadlidda is-dilida waxay siin kartaa qofka fikrad ah inuu is-dilo.

Xaqiiqo: Ka hadalka is-dilida kuma kalifeeyso qofka inuu is-dilo. In laga hadlo yaa run ah. In laga hadlo mawduuca is-dilida waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu waxtar badan ee aad samayn karto.

Khuraafad: Dadka ka hadla is-dilida run ahaantii ma sameeyaan.

Xaqiiqo: Ku dhowaad qof kasta oo is-dilaa wuxuu bixiyaa saadaal ama digniin. Ha iloobin hana dhayalsan dadka ku hanjaba in ay is-dilayaan. Hadalada ah, "waad ka xumaan doontaa markaan dhinto," ama "anigu ma arko si kale oo aan uga baxo dhibaatan" - si kasta ha ahaato hadalada is-dilka ee loo yiraahdo kaftanka - waxay muujin kartaan dareemo aad u xun.

Khuraafad: Haddii uu qofku rabo inuu naftiisa dilo, wax joojin karaa majiro.

Xaqiiqo: Xitaa qofka ugu niyadjabsan wuxuu wali dareen ka qabaa dhimashada, isaga oo ka fikiraya ilaa daqiiqada ugu dambeysa ee u dhaxeysa rabitaanka nolosha iyo rabitaanka dhimashada. Dadka is-dila intooda ugu badani ma doonayaan inay dhintaan; waxay rabaan in xanuunka iyo dhibka haysta inay joojiyaan. Rabitaanka degdega ah ee in uu qofku is-dilo, Ma aha wax waligiis waara ee wuu joojin karaa.

Khuraafad: Qof kasta oo isku daya inuu naftiisa dilo waa qof waalan .

Xaqiiqo: Dadka raba in ay is-dilaan intooda ugu badani ma aha dad jaha wareersan ama waalan . Waxaa laga yaabaa inay niyadjab ama murugo ay ku jiraan ama ay isticmaalaan maandooriyaha ama ay qabaan xanuun xaga dareenka. Xanuunka dareenka waa calaamadaha cudurka maskaxda, laakiin ma aha calaamadaha cudurka waalida.

Khuraafad: Waa wax caadi ah in dhalinyaradu ay noqdaan kuwo niyad-jabsan; dhalinyaradu inta badan kuma dhaco niyad-jabka .

Xaqiiqo: Murugada iyo niyad-jabku waxay saameyn kartaa dadka da'kastaba ama jinsiyad kasta, ama koox dhaqaale kastaba. Sida jirro kasta, niyad-jabka ayaa saameyn ku yeelan kara dhalinyarada u muuqda "inay ladanyahiin." Fikradda niyad-jabka ee dhalinyarada iyo dhallinyarada waaweyn waxay kordheen min 8.7% sanadkii 2006 ilaa 11.3% sannadka 2014. Inkastoo niyad-jabku u muuqdo in uu kor u kacayo, daaweynta ayaa caawin karta dhalinyaro badan oo la tacaalaysa jiradaan.

Khayaali: Dhalinyarada sheegata in ay niyad-jabsan yihiin waa daciif waxa kaliya oo ay u baahan yihiin waa in ay noqdaan dad adadag oo isku filan. Ma jiraan wax qof kale samayn karo si loo caawiyo.

Xaqiiqo: Murugadu ma aha daciifnimo; Waa xanuun khatar ah oo caafimaad. Dhallinyarada iyo dadka waaweyn ee niyad-jabsan waxay u baahan yihiin daaweyn xirfad leh. Tababaraha ama la taliyaha caafimaadka ayaa ka caawin kara inay ku baraan siyaabo fara badan oo maskaxda loo dejiyo, loo badalo dabecadaha, xalinta dhibaatooyinka, ama xakamaynta xiriirka. Dhakhtarka ayaa kuu qori kara daawooyin kaa caawiya calaamadaha niyad-jabka. Dad badan, waxaa caawiyey daaweyn iyo la tashiga dhakhtarka.

Khuraafad: Waa sahlan tahay in la ogaado marka dhallinyaradu ay niyad-jabsan yihiin sababtoo ah way ooyaan mar kasta waxeyna ka fogaadaan asxaabta iyo qoyska.

Xaqiiqo: Inkastoo murugada iyo wal bahaarka ay ka mid yihiin niyad-jabka hadana lama wada ogaan karo calaamadaha niyad-jabka qaarkood. Dhalinyaradu waxay u muuqan karaan kuwo careysan ama welwelsan. Waxaa laga yaabaa inaysan lahayn tamar ayna dareemayaan daal laakiin ay dhibaato ka haysato hurdada; ama ay seexdaan hurdo badan. Waxay lumin karaan rabitaankooda xaga cuntada ama waxey cuni karaan cunto badan oo keeni karta isbedel xaga miisaanka jirka. Waxa Kaliya ee cabiri Kara in u qofku qabo xanuunka niyad-jabka waa takhtar xirfad u leh.

Khuraafad: Niyad-jabka waa dhibaataada kaliya ee caafimaadka maskaxda ee la xiriirta isdilka.

Xaqiiqo: Inkastoo niyad-jabku si aad ah ugu xiran yahay is-dilka dhalinyarada, welwelka kale ee xaga caafimaadka maskaxda ayaa iyadana muhiim ah. Dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka ayaa ah saadaal xoog leh ee isdilka. Haddii qof dhalinyaro ah uu isticmaalo aalkolo ama daroogo si uu ula tacaalo walbahaar iyo isku buuq, waxay halis dheeraad ah u yihiin in ay isku dayaan in ay is-dilaan. Dhalinyarada qaarkood waxay isticmaalaan in ay naftooda dhaawac u geystaan (waxyeello isu geystaan) si ay ula tacaalaan murugada xun. Inkasta oo dhaawacyadani aysan guud ahaan ku lug laheyn is-dilida, hadana ardayda naftooda-dhaawacda ayaa halis dheeraad ah leh. Ka hortaga iyo daaweynta dhammaan xanuunada welwelka caafimaadka maskaxda ayaa ah ilaalinta ugu haboon ee khatarta is-dilka.

Wac Nidaamka Ka-hortagga Is-dilka xakamaynta Qaranka 24/7 hel taageero bilaash ah oo qarsoodi ah 1-800-273-8255.